JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sananadka 10aad* | *Cadad Gaar ah* | *08/01/2022* |

## FAAFINTA RASMIGA AH EE SADDEX BILOOD-LAHA AH
## OCTOBER TO DECEMBER

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2021*

## TUSMADA CADADKA


| | | |
|---|---|---|
| **QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:** | | |
| 1. | **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:** | | |
| 2. | **Xilka-qaadis** | 4 |
| 3. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 5 |
| 4. | **Xilka-qaadis** | 6 |
| 5. | **Xilka-qaadis** | 7 |
| 6. | **Xilka-qaadis** | 8 |
| 7. | **Xilka- qaadis** | 9 |
| 8. | **Xilka-qaadis** | 10 |
| 9. | **Xilka- qaadis** | 11 |
| 10. | **Xilka-qaadis** | 12 |
| 11. | **Xilka-qaadis** | 13 |
| 12. | **Xilka-qaadis** | 14 |
| 13. | **Xilka-qaadis** | 15 |
| 14. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabis | 16 |
| 15. | **Xil ka Qaadis** | 17 |
| 16. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 18 |
| 17. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 19 |
| 18. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 20 |
| 19. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 21 |
| 20. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 22 |
| 21. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 23 |
| 22. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 24 |

| | | |
|---|---|---|
| 23. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 25 |
| 24. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 26 |
| 25. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 27 |
| 26. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 28 |
| 27. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 29 |
| 28. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 30 |
| 29. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 31 |
| 30. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 32 |
| 31. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 33 |
| 32. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 34 |
| 33. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 35 |
| 34. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 36 |
| 35. | **Xilka-Qaadis** | 37 |
| 36. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 38 |
| 37. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 39 |
| 38. | **Xilka-qaadis** | 40 |
| 39. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 41 |
| 40. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 42 |
| 41. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 43 |

| | | |
|---|---|---|
| 42. | **Xilka-qaadis** | 44 |
| 43. | **Xilka-qaadis** | 45 |
| 44. | **Xilka-qaadis** | 46 |
| 45. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 47 |
| 46 | **Xilka-qaadis** | 48 |
| 47 | **WareegtoMadaxweyne** Magcaabid | 49 |
| 48 | **Xilka-qaadis** | 50 |
| 49. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 51 |
| 50. | **Wareegto Madaxweyne** Magcaabid | 52 |
| 52. | **XEER MADAXWEYNE** Wasaaradda Horumarinta Reer Miyiga | 53 |
| 53. | **Xilka-qaadis** | 57 |
| 54. | **Xilka-qaadis** | 58 |
| 55. | **Xilka-qaadis** | 59 |
| 56. | **XEER MADAXWEYNE** Wasaaradda Deegaanka Iyo Is-Bedelka Cimillada | 60 |
| 57. | **XEER MADAXWEYNE** Mamnuucidda Ka- Qayb- Qadashada Siyaasada Soomaaliya | 64 |
| 58. | **Wareegto Madaxweyne** Cafis | 66 |

**QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA:**

**59. SOMA BIXIN**

**QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARAD**

**60. SOOMA BIXIN**

**QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:**

**61. SOOMA BIXI**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-718/092021 Taar:25/09/2021**

**Ku: Mubaarag Cabdillaahi Ibraahin;**
**Agaasimihii Guud ee hore ee Wasaaradda Gaashaa-dhiga.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad hore ugu haysay Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-719/092021 Taar: 25/09/2021

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqootooda, Kartidooda iyo Waaya-aragnimadooda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karaan Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilalkan;

Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aamiyay;</u>

In laga bilaabo taariikhda maanta aan masuuliyiintan u magacaabo xilalkan:

| Tir | Magaca | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Maxamed Cabdilaahi Ducaale Cajab | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah |
| 2. | Cabdirisaaq Jaamac Nuur Naakhuude | Agaasimaha Guud ee Wasaradda Waxbarashada iyo Sayniska |
| 3. | Axmed Abokor Maxamed Yuusuf | Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gadiidka iyo Hormarinta Jidadka |

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-720/102021 Taar:06/10/2021**

**Ku: Cabdiraxmaan Maxamed Muxumed;**
**Agaasimihii Guud ee Wasaraadda Ganacsiga iyo Dalxiiska.**

**Ujeedo:** **Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-721/102021 Taar:06/10/2021**

**Ku: Maxamed Xasan Dirir;**
**Agaasimihii Guud ee Wasaraadda Horumarinta Biyaha.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-722/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Maxamed Cabdillaahi Siciid Khaawi;**
**Agaasimihii Guud ee Wasaraadda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha.**

**Ujeedo: <u>Xilka-qaadis</u>**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-723/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Cabdinaasir Axmad Xirsi Maxamed;**
**Agaasimihii Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayay dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-724/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Jamaal Cabdi Muuse Diriye;**
**Agaasimihii Guud ee Wasaraadda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-725/102021 Taar:06/10/2021**

**Ku: Maxamuud Ismaaciil Cilmi Deeq;**
**Agaasimihii Guud ee Koomiishanka Maamul Wanaagga.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socotaan, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan idinka qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-726/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Axmad Muuse Muruud;**
**Agaasimihii Guud ee Koomiishanka Tacliinta Sare**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**
**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-727/102021** **Taar:09/10/2021**

**Ku: Mustafe Cabdi Muuse;**
**Guddoomiyihii Gobolka Buuhoodle.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey sunnihiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**
**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-728/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Cabdishakuur Ismaaciil Muumin;**
**Agasimihii Guud ee Komiishanka Qaranka ee Xakamaynta AIDS-ka**

**Ujeedo: <u>Xilka-qaadis</u>**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-729/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Xasan Axmad Ibraahin (Embassy);**
**Maareeyihii Hore ee Haamaha Kaydka Shiidaalka Qaranka**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-730/102021 Taar: 09/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aamiyay;</u>

In Nasteex Maxamed Cabdille Maxamuud laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Buuhoodle ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-731/102021** **Taar:06/10/2021**

**Ku: Cawaale Faarax Cilmi;**
**Guddoomiye Ku-xigeenkii Gobolka Awdal**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane,**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad Qaranka u haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad qaranka u shaqaynaysay.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-732/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay:La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Cabdirashiid Xirsi Cali Cilmi laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

---

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-733/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay:La-tashi ;

<u>Waxaan Go'aamiyay ;</u>

In Xamse Xaamud Guuleed laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska Jamhuuriyadda Somaliland .

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-734/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Cabdirashiid Caydiid Yaasiin Fidhin laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-735/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay;

In Aadan Cabdillaahi Sheekh Muuse laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Beeraha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-736/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Axmad Yaasiin Muxumed Xasan laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-739/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay:La-tashi ;

<u>Waxaan Go’aamiyay ;</u>

In Cabdi Faarax Belel Aadan laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Biyaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-740/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aamiyay;</u>

In Axmed Xasan Aadan Cabdi laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-741/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay;

In Ibraahin Aamin Gadiid Galab laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Guddida Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-742/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoonteeda, Kartideeda iyo Waayo-aragnimadeeda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karto Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay;

In Fadxiya Maxamed Cabdiraxmaan Daahir laga bilaabo taariikhda maanta ay ahaato Agaasimaha Guud ee Koomiishanka Maamul Wanaaga Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-744/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay;

In Axmad Cabdi Ismaaciil Caqli laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Komishanka Qaranka ee Xakamaynta AIDS-ka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-745/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aamiyay;</u>

In Axmad Ibraahin Cabdi Cabdalla laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Haamaha KaydkA Shiidaalka Qaranka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-748/102021 Taar: 23/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aansaday;

In Cabdikariim Aadan Siciid Cabdulle, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarin Reer Miyiga Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-749/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne

## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aamiyay ;</u>

In Sharma'arke Ismaaciil Idiris Iimaan laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda Duulista iyo Madaarada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-750/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay:La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Cabdikariin Ibraahin Saleebaan Cawaale laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Aagga Cashuuraha Ka-Caaggan (Free Zone) ee Jamhuuriyadda Somaliland .

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-751/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;

Markaan Sameeyay:La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Rooble Cabdi Muuse Maxamed laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin ka tirsan Guddida Tacliinta Sare ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-752/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Muumin Muuse Ducaale Bidhiidh laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddomiye Ku-xigeenka Gobolka Awdal ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-753/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay:La-tashi ;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Muxumed Xasan Jaamac Mixile laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddomiye Ku-xigeenka Gobolka Togdheer ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-754/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Cabdiraxmaan Sh. Xasan Ismaaciil Bile laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Baanka Dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-755/102021 Taar: 06/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay;

In Cabdillaahi Maxamed Maxamuud Cilmi laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-757/102021** **Taar:23/10/2021**

**Ku: Nuur Qaasim Qodax;**
**Gudoomiye ku- xigeenkii Gobolka Saraar.**

**Og; Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-759/102021 Taar: 23/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Tixgeliyay: Buuxinta Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

<u>Waxaan Go'aansaday ;</u>

In Abokor Shide Cali Cabdille, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-760/102021 Taar: 24/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aansaday;

In Mukhtaar Maxamed Gaax-nuug Jaamac, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin katirsan Guddida Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-762/102021** **Taar:28/10/2021**

**Ku: Faysal Sahal Jaamac;**
**Guddoomiye ku- xigeenkii Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.**

**Og; Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane;**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-763/102021 Taar: 28/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay;

In Yuusuf Warsame Xasan Cawad laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolajiyadda Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-764/102021 Taar: 28/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoonteeda, Kartideeda iyo Waayo-aragnimadeeda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karto Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay;

In Aamina Xuseen Maxamuud Jaamac, laga bilaabo taariikhda maanta ay ahaato Guddomiye Ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-766/102021 Taar: 31/10/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyay ;

In Mawliid Nuux Ibraahin, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Hay'adda Waddooyinka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-767/112021 Taar:01/11/2021**

**Ku: Maxamed Faarax Xareed;**
**Xubin ka mid ahaa Guddida Tacliinta Sare Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane;**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad hore ugu haysay Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-771/112021** **Taar:01/11/2021**

**Ku: Maxamed Cabdi Maxamuud Samatar;**
**Wasiir ku- xigeenkii Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane;**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad hore ugu haysay Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-775/112021** **Taar:01/11/2021**

**Ku: Nuux Maxamed Xuseen;**
**Guddomiyihii Guddida Qandaraasyada Qaranka**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Mudane;**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad hore ugu haysay Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-776/112021 Taar: 01/11/2021

## Wareegto Madaxweyne
## <u>Magacaabid</u>

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

<u>Waxaan Go'aansaday ;</u>

In Maxamed Cabdillaahi Guuleed laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddomiyaha Guddida Qandaraasyada Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-777/112021 Taar:10/11/2021**

**Ku: Maxamed Axmad Cawaale;**
**Xubin ka tirsan Komishanka Maamul-wanaagga.**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay .**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa Mudadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-780/112021 Taar: 10/11/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

Waxaan Go'aansaday ;

In Axmed Xasan Ibraahim, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin ka tirsan Komishanka Maamul-Wanaagga Jamhuuriyada Soomaaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-781/112021** **Taar:10/11/2021**

**Ku: Saleebaan Diiriye Cabdi ;**
**Guddomiye ku-xigeenkii Gobolka Sool**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay Qaranka .**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa Mudadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-782/112021 Taar: 10/11/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

Waxaan Go'aansaday ;

In Maxamed Aadan Cumar Maxamed , laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Sool ee Jamhuuriyada Soomaaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-783/112021 Taar: 10/11/2021

## Wareegto Madaxweyne
## Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo Waayo-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay :In uu Hanan Karo Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilkan;
Markaan Sameeyay: La-tashi ;

Waxaan Go'aansaday ;

In Maxamed Axmed maxamuud Diiriye, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyada Soomaaliland ee Dalka Kinya.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-784/112021 Taar: 10/ 11/2021

## Xeer Madaxweyne Lr14/112021

## Wasaaradda Horumarinta Reer Miyiga

**Ujeedo; (Lifaaqa3aad)- Kaabista iyo Wax-ka-bedelka Xeer Nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukumadda ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018.**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: qodobka18aad iyo Qodobka 104aad, Faqradiisa 1aad ee xeerka kala xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, Xeer Lr,71/2015;

Markaan Arkay: In Horumarinta Reermiyigu aanay ku koobnayn wax-qabad ama adeeg gaar ah, balse ay ka koobantahay barnaamijyo isku dhafan oo koobsanaya kor u qaadidda noloshsha bulshada reer miyiga ee dhinacyada wax-soo-saar ka,dhaqaalaha,dammaanad-qaadka cuntada,shaqo-abuurka iyo horumarinta kaabayaasha adeegyada aas-aasiga ah ee arrimaha bulshada;

Markaan Arkay: muhiimadda ay leedahay isku-dubaridka iyo xidhiidhinta barmaanijyada iyo wax-qabad ee horumarinta reer miyiga, si loo helo qorshe midayan.( Integrated Rural Development) oo ka kooban dhamaan barnaamijyada iyo wax-qabadyada horumainta reer miyiga ee dalka oo dhan;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay u leedahay horumarinta reer miyiga koboca dhaqaalaha iyo la dagaalanka saboolnimada, maadama bulshada inteeda badani ay degan tahay dhulka miyiga ah sidoo kalena nolosha dhaqan-dhaqaale ee bulshada inteeda kale ay ku tiirsan tahay wax-soo-saarka reer miyiga;

**<u>Waxaan Soo-saaray;</u>**

Lifaaqa 3aad-oo la xidhiidha kaabista iyo Wax-ka-badalka Xeer Nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 oo ah sidan hoos ku xusan;

1) Qodobka 4aad, firqadiisa 19aad iyo Qodobka 22aad ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 ee la xidhiidhay dhismaha iyo shaqooyinka Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer-miyiga waxa laga saaray qaybtii la xidhiidhay Horumarinta Reer Miyiga, waxaana lagu wareejiyay Wasaaradda cusub ee Horumarinta Reer Miyiga.

2) Xilka iyo waajibaadka Wasaaradda cusub ee Horumarinta Reer Miyigu waxay noqonayaan sidan;

a) Diyaarinta iyo hirgalinta Siyaassada Qaranka ee la xidhiidha horumarinta Reer Miyiga Jamhuuriyadda Somaliland.

b)Abuuridda qorshayaal ku wajahan kor u qaadidda iyo daryeelka hab-nolaleedka bulshada Reer Miyiga ah.

c)Xidhiidhinta mashaariicda lagu hormarinayo bulshada Reer Miyiga ah ee dhammaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn si looga hortago isdul-fulka wax-qabadyada ee meel kaliya.

d)Daraasaynta iyo soo bandhigidda hindise-cilmiyeed lagu hormarinayo nolosha bulshada Reer Miyiga ah,iyadoo la ogaanayo caqabadaha iyo baahiyaha,soona jeedinaysa xalka suurtagalka ah ee kor loogu qaadayo fursadaha Reer Miyiga.

e) Ka caawinta bulshada Reer Miyiga ah sidii ay uga gaashaaman lahaayeen is-bedelka cimillada,iyadoo la siinayo wacyi-galin iyo in ay abuurto fagaare wada-tashi ee la xidhiidha horumarinta Reer Miyiga.

f) Ka hawl-galidda in kor loo qaado dakhliga iyo isku fillaanshaha cuntada ee bulshada Reer Miyiga ah iyadoo laga taageerayo horumarinta dhinacyada adeegyada arrimaha bulshadaiyo dhismaha adeegyada dhaqaale ee Reer Miyiga.

g) Ka hswl-galidda iyo fududaynta in adeegyada aas-aasiga ee arrimaha bulshadu ay gaadhaan bulshada Reer Miyiga ah.

h)Horumarinta iyo kor-u-qaadidda xaaladda nololeed ee bulshada Reer Miyiga ah, si loo cidhib-tiro saboolnimada, korna loogu qaad dhaqaalaa bulshada.

i) Taageeridda iyo ka-hawl-galidda sidii loo heli lahaa tababarro loogu talo galay in lagu dhiso awoodaha iyo xirfadaha bulshada Reer Miyiga ah.

j) Hir-galinta hanaanka ka qayb-qaadashada iyo abuuridda lahaanshaha ee mashaariicda iyo barnaamijyada bulshada Reer Miyiga.

k) Isku-duwidda iyo ka war bixinta barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta ee Reer Miyiga.

l)kor-u-qaadista amniga wada-jirka, wax-wada-lahaanshaha iyo iskaashiga bulshada Reer Miyiga ah , si looga hor tago colaadaha ka yimaada dhul-daaqsimmeedka, biyaha IWM.

m)Fulinta xilka iyo waajibaadyada kale ee ay u xil-saaraan xeerarka dalka

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweyanaha Jamhuuriyada somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-786/122021** **Taar:01/12/2021**

**Ku: Maxamed Cilmi Xuseen,**
**Guddomiyihii Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay .**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa Mudadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-789/122021 Taar:01/12/2021**

**Ku: Maxamed Cabdiraxmaan Liibaan;**
**Maareeye ku-xigeenkii Madbacada Qaranka**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay Qaranka.**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa Mudadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-793/122021** **Taar:01/12/2021**

**Ku: Axmad Cabdirisaaq Diiriye ;**
**Agaasimihii Guud ee Guddida Qandaraasyada Qaranka**

**Ujeedo: Xilka-qaadis**

**Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayay dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darteed, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay .**

**Waxaan kaaga mahad-celinayaa Mudadii aad haysay xilka Qaranka.**

**Allaa Mahad Leh**

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-796/122021 Taar: 06/12/2021

**<u>Xeer Madaxweyne Lr.15/122021</u>**

**Ujeedo: (Lifaaqa 4aad)- Kaabista iyo Wax-ka-bedelka Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukumadda ee Xeer-nidaamiye Lr.01/2018.**

**<u>Wasaaradda Deegaanka iyo Is-bedalka Cimilada</u>**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: qodobka18aad iyo Qodobka 104aad, Faqradiisa 1aad ee xeerka kala xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan, Xeer Lr,71/2015;

Markaan Arkay: Muhiimada ay leedahay sidii loo yaraynlahaa dhibaatada iyo saameynta ay is-bedalka cimilada aduunku ku yeelatay hab-nololeedka (livelihoods) dadka iyo sidii dalku uga qayb qaadan lahaa dedaalka aduunku iska kaashanayo ee lagu yaraynayo wasakhawga hawada ;

Markaan Arkay: Dhibaatada is-badalka cimilladu ku keentay deegaanka,kuwaas oo ay ka miid yihiin xaalufka deegaanka, abaaro soo noq-noqda,nabaad-guurka IWM, kuwaas oo caqabad ku ah nolosha dadka iyo duunyadaba;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay leedahay isku-dubaridka iyo xidhiidhinta barmaanijyada wax-qabad ee la xidhiidha ka hortaga iyo yaraynta dhibaatooyinka ka yimaada is-badalka cimillada,si loo helo qorshe midaysa oo u yeesho Qaranku;

**Waxaan Soo-saaray;**

Lifaaqa 4aad oo la xidhiidha Kaabista iyo wax-kabadal-ka Qodobka 4aad farqadiisa 19aad iyo Qodobka 22aad ee Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaraddaha iyo Hay'adaha Xukuumadda ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 oo ah sidan hoos ku xusan'

1) Qodobka 4aad, firqadiisa 19aad ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 ee la xidhiidhay dhismaha Wasaaradda Deegaanka, waxa lagu daray weedhan "**iyo Isbadalka Cimillada"**waxaanu noqonayaa magaca cusub ee Wasaaraddu sidan"**Wasaaradda Deegaanka iyo Is-badalka Cimillada".**

2) Qodobka 22aad ee Xeer-nidaamiye Lr.01/2018 ee la xidhiidhay awoodaha iyo shaqooyinka Wasaaradda waxa lagu sameeyay wax-ka-badal iyo

kaabis,waxaana uu Qodobkaasi noqonayaa sidan

**Qodobka 22ad; Wasaaradda Deegaanka iyo Is-badalka Cimiladda**

Wasaaradda Deegaanka iyo Is-badalka Cimilladu waxa ay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan;

1. Dejinta iyo Hirgalinta siyaasadaha iyo xeerarka Xukuumadda ee la xidhiidha horumarinta deegaanka, is-badalka cimillada iyo la dagaalanka xaalufka iyo nabaad- guurka.
2. Dejinta qorshayaasha lagu horumarinayo deegaanka iyo kuwa lagaga hortagayo dhibaatooyinka deegaanka ee dabiiciga ah iyo kuwa bini'aadamku sababaanba.
3. Ka hawl-galida sidii looga midho-dhalin lahaa u jeedooyinka deegaanka iyo is badalka cimillada ee ku xusan Dastuurka, siyaasadda deegaanka iyo qorshayaasha kale ee Qarankaba.
4. Qorshaynta iyo kala-xadaynta dhul-daaqsimeedyada iyo seerayaasha loogu talo-galay xoola-dhaqatada iyada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda.
5. Ka hawl-galida sidii looga hortagi lahaa xaalufka iyo nabaad-guurka iyadoo ciidda iyo dhirtaba la daryeelayo, isla markaana la qorshaynayo habsami u isticmaalka dhul-daaq-simeedka, iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso.
6. Dejinta iyo fulinta hab lagu qiimaynayo saamaynta deegaan ee ay yeelan karaan warshadaha iyo barmaanijyada horumarineed ee dalku ;
7. Diyaarinta habab kor loogu qaadayo daryeelka deegaanka, iyada oo la yaraynayo walxaha sunta ah ee deegaanka wax-yeelaynaya ee ka dhasha farsamaynta alaabta iyo warshadaha
8. Diyaarinta Siyaasada Qaranka ee la xidhiidha is-badalka cimillada,si ay gundhigugu noqoto

barnamijyada iyo qorshaha is-badalka cimillada iyo la socodka hawlaha is-badalka cimillada

9. Daraasaynta iyo soo bandhigida hindise-cilmiyeed lagu qiimaynayo unuglaanshaha is-badalka cimillada iyo la qabsiga is-badalka cimillada si looga hortago saamayta ay ku yeelan karto bii'ada iyo nolosha bulshadaba.
10. Qabashada wacyi galin guud oo la xidhiida Is-badalka Cimiladda iyo saamaynta ay ku leedahay nolosha dadka iyo dunyadaba.
11. Diyaarinta qorshayaal lagaga hortagayo saamaynta is-badalka cimillada ee la xidhiidha xaalufka deegaanka,biyo-yaraanta,carro-guurka, daadadka IWM.
12. Isu-duwidda iyo ka war-bixinta barmaanijyada iyo mashaariicda la xidhiidha Is-badalka Cimilladu.
13. Dejinta qorshayaasha horumarinta deegaanka,iyo dhiiri galinta,si habboon u isticmaalka khayraadka dabiiciga ah, si aanay deegaanka dhibaato ugu iman.
14. Ka hawl-galidda sidii loo abuuri lahaa seerayaal iyo xerooyin lagu xannaaneeyo duur-joogta.
15. Ku-wacyi-galinta bulshada daryeelka duurjoogta.
16. Samaynta qorshayaaha lagu cidhib-tirayo dhuxulaysiga dhirta iyo ka ganacsigeeda.
17. Diyaarinta qorshaasha lagu badalayo shidashada dhuxusha.
18. Iyo fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xil-saaraan Xeerarka dalku

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweyanaha Jamhuuriyada somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-797/122021 Taar: 06/12/2021

**Xeer Madaxweyne Lr.16/122021**

## Mamnuucidda Ka-Qayb-Qaadashada Siyaashada Soomaaliya

Markaan Arkay: Go’aanka Labada Gole(Guurtidda iyo Wakiiladda) ee sumaddiisu tahay JSL/GB/01/10/2003, kuna taariikhaysan 11/10/2003, ujeedadiisuns tahay mamnuucida ka-qayb-qaadashada siyaasadda soomaaliya ;

Markaan Arkay: Degreeto Madaxweyne No;213/2003 ee kutaariikhysan 29/10/2003,ee lagubaahinayay go’aanka ay wada-jirka ku soo saareen labada Gole Qaran ee Baarlamaanka(Guurtida iyo Wakiilada);

Markaan Arkay: Waajibaadka uu Dastuurku saaray muwaadin kasta oo ah adkeynta midnimada umadda,ilaalinta jiritaanka Qaranimadda iyo difaaca dalka iyo diinta siwaafaqsan Xeerka,sida ku cad Qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markaan Ku Qancay: In ay tahay Danbi Khiyaamo Qaran oo lid ku ah Qarannimada iyo Madax-bannaanida Jamhuuriyadda Somaliland ka-qayb-qaadashada hawlaha siyaasada soomaaliya ee lagu mamnuucay Go’aanka

Baarlamaanka Jamhuuruyadda Soamliland;

**Waxaan Soo-saaray;**

1) Qofkasta oo u dhashay dalkan Jamhuuriyadda Somaliland ha noqdo Masuul Dawladeed,Shicib Urur, Axsaab,Aqoonyahan,Madax-dhaqmeed, Suugaan-yahan iyo Dhamaanba qaybaha bulshada oo ka qayb-gala siyaasadda Soomaaliya ee lagu mamnuucay Go'aanka labada Gole ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Somaliland waxa lagu qaadi doono **Danbi Khiyaamo Qaran,**si waafaqsan Qodobka 1aad iyo 2aad ee Go'aanka Labada Gole.
2) Xukuumadda oo kaliya ayaa ka qayb gali karta shirarka ay ku kulmayaan Somaliland iyo Soomaaliya, ee loo arko inay dani ku jirto ee aan ka hor imanayn jiritaanka Qarannimada iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Somalialnd,si waafaqsan Go'aanka labada Gole ee sumadiisu tahay GB/G/01/02/2012 kuna taariikhaysan 05/02/2012.
3) Qof kasta oo ka qayb-gala arimaha siyaasada Soomaaliaya ee lagu mamnuucay Go'aanka laba Gole ee Baarlamaanka Jamhuuriyada Somaliland, lagama aqbali doono cafis ka hor inta aan la horgaynin Maxkamada awooda u leh oo aanu xukum Maxkamadeed ku dhicin.
4) Dhamaan hay'adaha nabad-galyada ee ku shaqada leh waxa waajib ku ah inay fuliyaan Go'aanka Labada Gole, isla markaana horgeeyaan Maxkamada awoodda u leh qofkata aoo gala danbigaas, si loo adkeeyo Jiritaanka Qarannimada iyo Madax-bannanida Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweyanaha Jamhuuriyada somaliland

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-799/122021 Taar: 12/12/2021

## Wareegto Madaxweyne

## Cafis

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad xubintiisa 5aad;

Markaan Arkay: Xeerka Ciqaabta Guud,Qodobkiisa 149;

Markaan Tixgaliyay: Warbixinta Taliska Guud ee Ciidanka Asluubta ee sumadiisu tahay TCA/G-1/553/2021,kuna taariikhaysa 12/12/2021;

Markaan Arkay: Soo-jeedinta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee sumaddisu tahay XIG/JSL/367/2021 kuna taariikhaysan 11/12/202

Markaan Latashaday: Hay'adaha Ay khusayso;

**Waxaan Go'aansaday ;**

In laga bilaabo taariikhda maanta aan cafis Guud u fidiyay Maxaabiisa danbiyada fudud ku xukuman ee xabsiyada dalka ku xidhan, oo tiradood dhantahay 561(Sha Boqol iyo Kow iyo Lixdan) maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuquuqda madaniga ah, sida ku xusan qodobka 92 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Waxa cafiskan fulinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo liiska maxaabiista wareegtadanku lifaaqan.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland